Somaliska

# SIYAASADDA XISBIGA GARABKA BIDIX EE VÄNSTERPARTIET

PÅ DIN SIDA

V

Miyaad adiguna qabtaa in qof kasta oo Iswiidhan ku nool ay tahay inuu awoodo inuu kiro iyo cunto iska bixiyo?

Miyaad qabtaa in dhallinyaradu, meel kastaba ha ku barbaareene, ay tahay inay helaan shaqo iyo hoy, si ay mustaqbalkooda u dhistaan? Miyaad qabtaa in daryeelka caafimaadku uu u adeego bukaanka, ee uusan u adeegin macaash shirkado gaar ah oo caafimaad?

Markaa adiga iyo xisbiga garabka bidix ee Vänsterpartiet isku dhinac ayaad taagan tihiin.

Dhinaca kale waxaa taagan kuwa maanta Iswiidhan maammula: dawladda garabka midig iyo xisbiga Sverigedemokraterna.

Waxay canshuuraha ka dhimeen dadka ugu ladan, iyadoo carruur farabadan ay nolol sabool ah ku barbaarayaan. Daawooyinkii ayay qaaliyeeyeen, iyagoo ku khasbay isbitaallada iyo xarumaha caafimaadka inay adeegyadooda dhimaan. Waxay dalka ka saarayaan dad raba inay shaqeeyaan, dalka wax ku soo kordhiyaan, mustaqbalkoodana Iswiidhan ka dhistaan.

Miyaad adiguna ka daashay siyaasaddan tujaarta sii hodminaysa, dadka caadiga ahna iska horkeenaysa?

Miyaad u ooman tahay siyaasad u adeegta qof kasta oo u halgamaya sidii uu nolosha iyo nolol-maalmeedka isku waafajin lahaa? Qof kasta oo ilmo soo kaxeeya, shaqeeya, gurigiisa nadiifsada, wax barta, cuntadiisa karsada. Qof kasta oo qayb ka ah in dalkan quruxda badan uu u shaqeeyo si habsimi ah. Vänsterpartiet wuxuu diyaar u yahay inuu qayb ka noqdo dawlad cusub oo doonaysa inay dhisto bulsho ka nabadgelyo iyo caddaalad badan tan hadda jirta, iyadoon loo eegayn halka uu qofku ka soo jeedo. Dawlad ka shaqaysa inaynu helno guryo kiro macquul ah leh, dhimista sicirka cuntada iyo korontada, iyo horumarinta tayada waxbarashada dugsiyada iyo daryeelka caafimaadka.

Vänsterpartiet. Dhinacaaga ayaynu taagan nahay.